Salaam,

Waxaan si xamaasad leh ugu diyaar garoobeynaa Maalinta U-doodista Carruurta ee sannadkan ee dibad-baxa onlaynka ah oo la qaban doono Maarso 16-keeda, 2022 waxaana rajeyneynaa inaad nagu soo biiri doontid! Maalinta U-doodista Carruurta waa munaasabad aad u weyn taasi oo aan xildhibaanadayada ku xusuusino inay maskaxda ku hayaan carruurnimada hore marka ay kulankan ka codeynayaan.

Ku wadaagista codadka carruurta golaha barlamaanka iyada oo la adeegsanayo farshaxan.

Fadlan ka qaybqaado mashruucayaga farshaxanka si aad inooga caawso in aan codadka carruurtayada si onlayn ah ku gaarsiino ''golaha baarlamaanka''!

Waxaan ka codsaneynaa waalidiintayada, barayaashayaga iyo daryeel bixiyeyaashayada caruurta in ay carruurtooda ama ardaydooda la wadaagaan bog midab iyo madadaalo leh, si ay uga caawiyaan in caruurta ay wadaagaan hamigooda weyn ee mustaqbalka, ayna ugu dhiirigeliyaan in ay sawiraan ama muuqaaleyaan waxa mustaqbalkooda uu noqon doona.

Tani waa hab fiican oo looga qaybqaadan karo Maalinta U-doodista Carruurta maaddaama aanan halkaasi goob-joog ka noqon karin. Waa muhiim in xildhibaanada ay maqlaan ra'yikaaga iyo sheekooyinkaaga si ay u fahmaan muhiimada ay leedahay maalgalinta carruurnimada hore ee bulshadaada.

Waxaan xusuusinaynaa xildhibaanadayada in caruurteenu yihiin mustaqbalkeena!

Ha ka labalabayn inaad u ogolaato carruurtu inay sawiraan mustaqbalkooda iyagoo adeegsanayo hab kasta oo madadaalo iy soojiidasho leh. Carruurta qaar ayaa laga yaabaa inay jecel yihiin inay sawiraan mustaqbalkooda, qaarna waxay jecelaan karaan inay ku muuqaaleeyaan koolo iyo warqad, ama ranji.

Imayl ugu dir xildhibaankaaga farshaxanka cunugaaga ama ardaygaaga oo ay la socoto fariin.

Fadlan xildhibaankaaga imayl ugu dir fariin kooban iyo sawirro ama farshaxan la daabacay. Waxaad xildhibaanadaada iyo cinwaankooda imaylka ka heli kartaa HALKAN.

Waad ku mahadsantahay sida aad ugu heellan tahay carruurta iyo sida aad u xaqiijinayso inay helaan bilow xoogan oo caafimaad leh!

Riyo Weyn



Magacayga waa _____

Waxaan ka imid _____

Riyadayda mustaqbalka waa _____

Riyooyin weyn ayaan qabaa mustaqbalkeyga. Waad ka dhabayn kartaa.

TAARIIKHDA

Mudane / Marwo *[Xildhibaan ama Seneetar]*

Anigoo taageerayo U-doodista onlaynka ah ee Maalinta Caruurta ee sanadkan (Maarso 16-keeda, 2022) ayaa waxaan kuu soo dirayaa qoraalkan si aan kuugu dhiirrigeliyo inaad ku taageerto carruurtayada hamigooda weyn ee mustaqbalkooda! Muwaadiniinta ugu da'da yar Minnesota ayaa waxay matalayaan mustaqbalkeena, waana muhiim inaan siino waxa ay u baahan yihiin si ay u noqdaan kuwo caafimaad qaba, faraxsan kuna guuleysta nolosha. Tani micnaheedu waa in caruurta helaan kobaca hore oo tayo sare leh iyo jawi waxbarasho laga bilaabo xiliga dhalashada.

[Sheeko shaqsiyadeed oo ku saabsan sababta carruurnimada hore ay muhiim ugu tahay adiga iyo qoyskaaga ayaa halkan ku qoran.]

Gudaha bulshadeena iyo kuwa kale ee ku nool gobolka, waxaan si adag uga shaqeyneynaa taageerida iyo u diyaarinta caruurteena yar yar dugsiga iyo nolosha. Waxaan ogsoonahay in maalgalinta waxbarashadda hore oo tayo sare leh ay faa’iidooyin badan u lahaan doonto caruurteena, bulshooyinkeena, iyo gobolkeena. Waxaan ku soconaa jihada saxda ah marka la eego maalgalinadii ugu dambeeyay ee uu sameeyay gobolka, laakiin waa inaan wax dheeri ah sameynaa si aan u xaqiijino in dhammaan carruurta ay helaan fursadahan muhiimka ah.

Waxaan kusoo daray farshaxanka cunugeyga / carruurtayda iyo rajooyinkooda mustaqbal fiican. Fadlan na xusuusnow marka aad go'aanada gaareyso toddobaadyada soo socda.

Waxaan kaa codsanayaa inaad taageerto waxbarashada hore adiga oo *[maalgalinaya Barnaamijka Kaalmada Daryeelka Carruurta (Child Care Assistance Program, CCAP), Deeqaha Waxbarashada Hore (Early Learning Scholarships), Booqashada Guryaha ee Beegsiga ah (Targeted Home Visiting), Taageerooyinka Shaqaalaha Carruurnimada Hore (Early Childhood Workforce Supports), Waaxda Carruurnimada Hore (Department of Early Childhood)].*

Waad ku mahadsantahay u adeegidaada degmadayada iyo gobolkayaga.

Daacadnimo,

[Magacaaga]
[Cinwankaaga]

TAARIIKHDA

Mudane / Marwo *[Xildhibaan ama Seneetar]*

Anigoo taageerayo U-doodista onlaynka ah ee Maalinta Caruurta ee sanadkan (Maarso 16-keeda, 2022) ayaa waxaan kuu soo dirayaa qoraalkan si aan kuugu dhiirrigeliyo inaad ku taageerto carruurtayada hamigooda weyn ee mustaqbalkooda! Muwaadiniinta ugu da'da yar Minnesota ayaa waxay matalayaan mustaqbalkeena, waana muhiim inaan siino waxa ay u baahan yihiin si ay u noqdaan kuwo caafimaad qaba, faraxsan kuna guuleysta nolosha. Tani micnaheedu waa in caruurta helaan kobaca hore oo tayo sare leh iyo jawi waxbarasho laga bilaabo xiliga dhalashada.

[Halkan waxaa ku qoran sheeko shaqsiyeed, oo ay ku jiraan nooca barnaamijka waxbarashada hore - qoyska, xarunta daryeelka ilmaha, Head Start ama degmo dugsiyeedka]

Barnaamijkayga iyo kuwa kale ee ka jira gobolka, waxaan si adag uga shaqeyneynaa taageerida iyo u diyaarinta caruurta yar yar dugsiga iyo nolosha. Waxaan ogsoonahay in maalgalinta waxbarashadda hore oo tayo sare leh ay faa'iidooyin badan u lahaan doonto caruurteena, bulshooyinkeena, iyo gobolkeena. Waxaan ku soconaa jihada saxda ah marka la eego maalgalinadii ugu dambeeyay ee uu sameeyay gobolka, laakiin waa inaan wax dheeri ah sameynaa si aan u xaqiijino in dhammaan carruurta ay helaan fursadahan muhiimka ah.

Tusaalaha waxbarashada ka socota barnaamijkayga ahaan, waxaan kusoo daray farshaxanka carruurta kujirta barnaamijkayga iyo rajooyinkooda mustaqbal fiican. Fadlan na xusuusnow marka aad go'aanada gaareyso toddobaadyada soo socda.

Waxaan kaa codsanayaa inaad taageerto waxbarashada hore adiga oo *[maalgalinaya Barnaamijka Kaalmada Daryeelka Carruurta (Child Care Assistance Program, CCAP), Deeqaha Waxbarashada Hore (Early Learning Scholarships), CCAP, Booqashada Guryaha ee Beegsiga ah (Targeted Home Visiting), Taageerooyinka Shaqaalaha Carruurnimada Hore (Early Childhood Workforce Supports), Waaxda Carruurnimada Hore (Department of Early Childhood)].*

Waad ku mahadsantahay u adeegidaada degmadayada iyo gobolkayaga.

Daacadnimo,

[Magacaaga]
[Cinwankaaga]